

Tallaalada COVID-19 ee Pfizer/BioNTech iyo Moderna Wax farqi ah miyaa u dhexeeya?


Juun 7, 2021

Tallaalada COVID-19 ee Pfizer/BioNTech iyo Moderna asal ahaan waa kuwo is leh – labadooduba waa kuwo aad waxtar u leh, aad u amaan badan, si ficana loo daraaseeyay.



Tallaalada Moderna iyo Pfizer/BioNTech asal ahaan waa isku mid waxaana sameeyay shirkado kala duwan.

Waa sidii laba nooc oo ah biyaha dhalooyinka kujira – wax soo saar isku mid ah laakiin ay diyaariyaan shirkado kala duwan.



Tallaaladu waxay u shaqeeyaan qaab isku mid ah – labadooduba waa tallaalo mRNA ah.

Labaduba waxay siinayaan tilmaamo (“mRNA”) si ay u baraan hanaanka difaaca jirkaaga in uu aqoonsado fayraska COVID-19 si aad ula dagaalanto caabuqa haddii fayraska dhabta ah uu soo galo jirkaaga mustaqbalka. Tallaalka kuma jiro wax fayras ah.



Labada tallaalba waa kuwo wax ka taraya ilaalinta xanuunka COVID.

Daraasadaha sayniska ee balaaran, labada tallaalba waxaa lagu ogaaday in ay yihiin kuwo ku dhowaad 95% ay yihiin kuwo waxtar u leh ka hortagga xanuunka COVID markii laba jeer la qaato kadib.

Daraasaduhu waxay muujinayaan in labaduba ay aad wax uga tarayaan ka hortagga isbitaal seexinta iyo dhimashada la xiriirta COVID mararka dhif iyo naadirka ah ee qofka la tallaalay uu ku dhaco.



Labada tallaalba waxay leeyihiin saamayn xun oo isku mid ah, taasoo ah mid fudud oo ku meel gaar ah.

Saamaynta xun ee ugu badan waxaa kamid ah xanuunka garabka/cududda oo ah meesha laga duray, xanuun jirka iyo muruqa ah, qarqaryo, dareemidda daal iyo dareemidda qarqaryo. Saamaynadaan xun waxay kasoo raayaan hal ilaa saddex maalmood gudahood.

Tallaalada midkoodna si xun uma saamaynayo uurka ama awooddaada in aad ilmo yeelato. Tallaalada midkoodna ma sababo xinjirowga dhiigga.

Labada tallaalba waxaa la isaga duraa cududda kore – si dhakhso ah waxayna leeyihiin dhibsasho yar. Tallaalda midna midka kale kama xanuun badna.



Goobaha iyo isbitaalada tallaalku waxay helaan tallaaladaan midkood, ayada oo ay ku xiran tahay tallaalka diyaarka ah.

Keenista tallaal kasta ee gudaha Canada waa ay kala duwanaa kartaa maalinba maalinka ka danbeeya.



Tallaalada Pfizer/BioNTech iyo Moderna waa kuwo si isku mid ah waxtar u leh. Qaado midka lagu siiyo, adiga og in labaduba ka difaaci doonaan naftaada iyo dadka kale ee aad jeceshahay in aad la xanuunsato COVID-19.



Waxaan rajeyneynaa warbixintani inay kuu noqoto mid faa'iido leh! Waxaan kugu martiqaadeynaa inaad si ballaaran ula wadaagto dadka kale, u isticmaal sida qoraal ahaan si aad u duubto codka maqalka ama muuqaalka fidiyoowga, ama aad ugu turjunto luqado badan si aad ula wadaagto dadka kale. Fadlan hubi inaad mudnaanta siiso diyaariyaha warbixintan: Isbitaalka Haweenka ee College, OCASI, Xarunta TAIBU ee Caafimaadka Bulshada iyo Qaxootiga 613.

Sax ah laga bilaabo Juun 7, 2021

Macluumaadka ku qoran war-bixintan waxaa ansaxiyay dhakhaatiirta Canada: Meb Rashid MD, Kaaliye Profesor, Jaamacadda Toronto; Vanessa Redditt, MD, Macallin, Jaamacadda Toronto; iyo Isaac I. Bogoch, MD, Profesor khaas ah, Jaamacadda Toronto

{ REFUGEE } 613

BE IN GOOD HEALTH
TAIBU
COMMUNITY
HEALTH CENTRE

OCASI
Ontario Council of Agencies Serving Immigrants

WCHI
WOMEN'S COLLEGE HOSPITAL
Healthcare | REVOLUTIONIZED

Funded by:



Immigration, Refugees
and Citizenship Canada

Financé par :

Immigration, Réfugiés
et Citoyenneté Canada

With contributions from:

pchs 30
Serving Diverse Communities